



Salaan!

Waxaa u tartamayaa Jegada Gudoomiyaha Degmada Anoka (Anoka County Commissioner), jegadaa oo aan marna banaanaan ilaa iyo sannadkii 1954! Waqtigani waa waqtii runtii farxad gaar u leh bulshadeena, waxayna ii tahaya sharaf in aan helay codeyn ah 49% xilgii is reeb-reebka hore iyadoo ay ila tartamayeen afar musharax oo kale!

Waxaan beeshan ku dhix noolaa anigu muddo ku dhow 20 sanno waxaa ahaa tobankii sanno oo la soo dhaafay gargaare beeled xoogan oo gargaara dhinacyada wax barashada, cudurrada miyirka, wax ka qabadka mukhaadaraad isticmaalka, ilaalinta canshuur kordhinta. Wuxaan balan qaadayaa inaan wakiil ka noqdo Degmada Anoka oo dhan (Anoka County). Waxaan balan qaadayaa in aan kuugu yeero inaan miis wada fariisano si aan uga wada hadalo arrimaha muhiimka ah ee jira. Waxaan balan qaadayaa inaad dhageysto una dagaalamo maslaxada qoyskaaga!

#### **Arrimahayga:**

##### **Shaqooyin**

- Gargaarida Ganacsiyada
- Kocinta Bulshada iyo mac'hadyada farsamada
- Taakuleynta shaqooyinka fiican ee lacagta badan in laga helo Degmada Anoka (Anoka County)

##### **Adgeeyada Bulshada/Amaanka Dadweynaha**

- Wax ka qabadka xasarada ka taagan mukhaadaad isticmaalka, khayraad iyo wacyi gelinba.
- Dhaqan gelinta rugo laga helo adeegyada daryeelada caafimaadka ee miyirka la xiriira
- Joojinta ilhaamida la ilhaamayo dadka madaxa ka jiran iyadoo lagu waci gelinayo dadweynaha arintaa.

##### **Horumarinta Bulshada**

- Wadooyin, wadiiqooyin, marsho biyeediyo wacan oo amaan ah
- Guriyo iyo goobo casri ah oo Diyaar u ah in la jaan qaadaan Qarniga 21-aad
- Dhalinta wada hadal furan iyo is-dhex gal dhix mara beelaha kala duwan ee deegaanka ku dhaqan.

#### **Mashaariicda Horumarinta Bulshada:**

**Meekhaaminta Lacagta Canshuurta ka soo baxda**— Wuxaan ku dadaali doonaa in aan noqdo qof meekhaamiya lacagta canshuurta ah ee aad bixiso. Tusaale waxaa u noqon kara hawshan dadaalkaygii ku aadanaa rugta cusub ee (Fridley City Hall). Mashruuca Fridley City Hall waxaa uu maray dhamaan habraacyada waxaana loo ansaxiyey in la dhiso kolkii aakhirkii qolo soo baxday oo is hor taagtay. Qolada is hor taagtay af miishaaro ayey ahaayeen, oo waxa ay yiraahdeen malyuunaad ayuu ku kacaya mashruuca, taasoo keentay in ay heli waayeen qolada damb-damiska, iyo booliiska Fridley rugo ku filan oo ay isticmaalaan. Dhismahu ma lahayn meal kursiga lagu socdaa ka soo geli karo, mana ahayn mid casri ah oo la socda farsamada qarniga 21<sup>st</sup>, dhowr askarina waxaa xafiiska u ahaa meal luuq ah. Aniga ayaa kolkaa bilaabay hogaaminayeyna olle-olle aan ku abaabulayey beesha oo gargaaryey dhisida City Hall cusub. Olle-ollahaygii waa aanu ku guuleysanay waxaana la ogolaaday in dhismaha cusub uu bilowdo waqtigii loogu tala galay, waxaana u badbaadinay lacag malyuunaada canshuur bixiyeasha.

**Tacliinta**— Waxaan aasaasay aana abuubulay kooxda, Fridley TRIP. Fridley Middle School waxaa uu fidiyaa labo safar oo la aado Washington DC sanad walba. Qoysas badani waxa ay doonayeen in ay ka qayb galaan, laakiin dhaqaale ahaan dhib ayey ku ahayd in ay u diraan ardaydooda. (Fridley dhigata 65% qado lacag la; aan ah ama jaban). Waxaan abaabulay madaxna u noqday waalidiintu in ay ka qayb galaan hawlo lacag aruurun ah sanadkii. Kolkii sanadkii uu dhamaaday, lacag ka badan tobob kun (\$10K) ayaa u soo baxday qoysaskaa baahan lacag deeq ah meal ayaa loo dhigay ardayda mustaqbalka.

**Caafimaadka Miyrka iyo Qabatimida Maan-dooriyeyaasha**— Maadaama aan xubin ka ahay Golaha Maamulka Hay'ada Mercy Hospital Foundation, waxaan qayb ka ahaa kooxaha xariirinta bulshada si loo falan-

qeeyo adeegyada cusub iyo is-bedelada la yiraa Unity. Maadaama aan anigu xubin ka ahaa golaha, waxa aan ka qayb qaataay ka caawinta degmada adeegyada ku saabsan Adeegyada Caafimaadka Miyirka iyo Qabatimida Daroogada ee la heli karo, anigoo siinaya faham fiican oo ku saabsan arrimaha caafimaadka miyirka iyo u naxariisiga dadka madaxa looga jiro.

**Khibrada Dhaqaale**— Wuxaan ka tirsanahay Gudiga Dib u Eegida Deeqa (Grant Review Committee) ee hay'ada la yiraa (Mercy Hospital Foundation) gudigaa oo kor ka maamula miisaaniyad sannadle oo ah \$2 milyuun oo doolar sanadkii ah. \$2 dan milyuun waxaa loo qoondeeyey inay ku baxdo daryeelka bukaanka ee tooska ah, waxbarida shaqaalaha, maal-gelinta olle-olleyasha iyo xiriirkha beesha. Aniga ayey ahayd shaqadayda afartii sanno ee la soo dhaafay inaad qiiameeyo ka dibna aan gaaro go'aano ku saabsan sida ugu haboon ama ugu taabo galsan ee loo maal-gelinayo dhinacyada la maal-gelinayo.

### Aqoonsigaya

2012 – Waxaa la siiyey Shahaadooyinka kala ah (Friend of Youth Leadership Award) ("Innovative Funding Leadership") oo ay la ii siiyey (Youth Intervention Programs Assn) (YIPA) shaqo aan u qabtay rugta (Lee Carlson Center for Mental Health & Well-Being). (Patty Wetterling ayaa ku guuleysatay wax qabadka dhinaca Sharci dejinta.

Fadlan booqo shabakada [www.votemandy.com](http://www.votemandy.com) or <https://www.facebook.com/VoteMandy4AnokaCounty/> si aad wax badan uga ogaato arrimahan


### Ayidaaddaha aan helay:

Xildhibaan Connie Bernardy  
Xildhibaan Richard Jefferson  
Sanitor Jerry Newton  
Sanitor Barb Goodwin  
Sanitor Alice Johnson  
Sanitor Chris Eaton  
Xubinta Gudoonka Waxbarashada ee Fridley (School Board) Avonna Starck  
Xubinta Gudoonka Waxbarashada ee Fridley (School Board) Donna Prewedo

Duqa Fridley Scott Lund  
Xubinta Deegaanka ee Fridley Bob Barnette  
Xubinta Deegaanka ee Fridley Jim Saefke  
Xubinta Golaha Deegaanka ee Fridley Dolores Varichak  
Xubinta Deegaanka ee Fridley Ann Bolkcolm  
SHAQAALAHAY AYIDAY waa Teamsters WomenWinning

Wax badan oo kale ka ogow xubnaha kale ee beesha ee i taageersan aniga  
[www.votemandy.com!](http://www.votemandy.com)

Waa mahadan tahay – Waxaa kaa codsanayaa inaad aniga ee codeyso, Nofeember 6<sup>deeda!</sup>



Fiir gaar ah: Codeynta hore waxa ay ka bilaabmi doontaa, Jimcaha Sebteember 21<sup>st</sup> ay tahay (City Hall)!

